

Waxaa suuragal noqon karto innaad bixiso kharashka xannaanadda oo aan badnayn

Haddii daqliga qoyskaaga u ka hooseeyo 548 167 kar, waxaad codsan karta in hoos loo dhigo kharashka xannaanadda ee aad imminka bixiso. Sidoo kale haddii aad qabto carruur da'dooda ah ama ka wayn saddex sano, waxay xaq u leeyihiin cunto lacag la'aan ah.

Hoos u dhigida heerka kharashka ee waalidiinta ay bixiyaan

Haddii la go'aamiyo in hoos loo dhigo heerka kharashka ee waalidiinta ay bixiyaan, waxaad bixin doonta boqolkiiba 6 (kahor intii aan canshuurta laga jarin) ee daqliga qoyska. Kaasoo loo qaybin doono 11 bilood (bisha luulyo kharashka xannaanadda lama bixiyo).

Kharashkaas waxaad ku biirinaysa kharashka cuntada. Maamulka xannaanadda kasta ayaa go'aan ka gaara heerka kharashka cuntada ee laga doonaayo in waalidiinta ay bixiyaan. Sidaas darteed, heerarka way kala duwan yihiin hadba xannaanadda ubadkaaga lagu xannaanadeeyo.

Saacadaha xannaanadda ee kharash la'aanta

Haddii daqliga qoyskaaga u ka hooseeyo 533 500 kar, kahor intii aan canshuurta laga jarin, wuxuu qoyska isagoo aan codsan la siinayaa 20 saacadood toddobaadkii, xannaanadda ee kharash la'aanta ah, waa haddii carruurta da'dooda ay tahay ama ka wayn yihiin saddex sano.

Sida loo codsado

Adigoo farsamada elektroonikada adeegsanaayo ayaa foomka codsiga soo diri karta. Qoys kasta wuxuu u baahan yahay in uu soo diro hal foom oo codsi ah, xitaa haddii u qabo carruur tiro badan.

Go'aanka hoos u dhigida kharashka kahor, waa inaad bixisa kharashka oo aan qabyo ahayn. Hoos u dhigida kharashka wuxuu hirgalayaa markii codsiga laga oggolaado.

Bisha agoosto ee sannad kasta waa inaad cusboniisaa codsigaaga. Haddii daqliga qoyska u sannadka xannaanadda aad hoos ugu dhaco, waxaad soo diri karta codsi cusub.

Waa inaad noo caddaysa sida xaalad-dhaqaaleedka qoyska ay tahay

Foomka codsiga waa inaad ku soo lifaaqda qoraalada hoos ku xusan:

- Koobiga wargelinta canshuurta ee ugu dambeeyay.
- Caddaynta daqliga sida mushaharkaaga, dhaqdhaqaaq ganacsi, faa'iidooyinka shaqada, daqliga NAV, daqliga hawlgabyada. Warbixinta xaalad-dhaqaaleedka waa in aysan hal bil ka da'waynayn.
- Ardayda waa in dugsiga ka keenaan caddaynta waxbarashada ama koobiga kaarka ardayda.